NATIONWIDE CHILDREN'S®
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Sonkorowga: Cudurdaarka Dugsiga iyo Goorta ay taha in la Joogo Guriga

## Diabetes: School Excuses and When to Stay Home (Somali)

Waxaa muhiim ah inaad ogaato waqtiga uu cunuggaaga sokorowgaqaba guriga joogi doono. Tilmaamahan wuxuu ka hadlayaa sababaha guriga lagu joogaayo iyo sida loo helo cudurdaarka dugsiga.

Sonkorowga guud ahaan waa inuusan u keenin ilmahaaga maalmo ka xanuun badan marka loo eego ardayda kale. Waxaan rabnaa in ilmahaagu awoodo inuu aado dugsiga.

### Marka Ay Tahay In Cunagaaga Lagu Hayo Guriga

| WAA INUU guriga joogaa | LAGA YAABA INUU guriga joogaa |
|---|---|
| • Waxaa lagu daweeyey glucagon wakhti kasta maalintaas ama habeenkii ka horeeyay<br>• Sonkorta dhiigga oo ka yar 70 mg/dL halkii mitirba akhrinta oo u baahan 3 ama in ka badan oo daaweyn ah<br>• Ketones oo sonkorta dhiigga ay ka yar tahay 70<br>• Ketones oo ay ku jiraan matag iyadoo aan loo eegeyn sonkorta dhiigga | • Ketone-yada dhexdhexaadka ah ilaa kuwa waaweyn oo lagu daweeyey 2 jeer iyada oo aan wax horumar ah la gaarin<br>• Ketone-yada oo dhexdhexaad ah ama aad u badan iyo dareen xun |


©2017, Waxaa dib loo eegey 2024, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

## Goortii Ay Tahay inuu Canugaaga Sii Joogo Dugsiga

| WAA Imahaagu inuu dugsiga joogo oo aan guriga loo dirin isagoo |
|---|
| • Sonkorta dhiigga oo sareysa ama hooseysa oo la daweeyay |
| • Ketones, laakiin aad u fiicnaanaya oo aadan qufacayn |

## Ka Helitaanka Cudurdaar Dugsiyeedka ee Cisbitaalka Nationwide Children's Hospital

- Waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waa inuu wacaa xafiiska cilmiga neerfaha **isla maalinta uu ilmuhu ka maqanyahay iskuulka 12ka galabnimo**. Haddii aad dooneysid inaad fariin u dirto, sheeg magacaaga, magaca cunuggaaga, taariikhda dhalashada, iyo lambarka taleefanka ee aan kaala soo xiriiri karno. Sidookale sharax sababta aad u codsanayso cudurdaarka dugsiga. Fadlan nagala soo xiriir (614) 722-4425.
- Xubinta kooxdu waxay raaligelin u diri doontaa oo keliya haddii la oggolaado mid ka mid ah sababaha ku qoran bogga 1.
- Haddii ilmahaagu uu ka maqnaanayo wax ka badan 3 maalmood sanad dugsiyeed sababo la xiriira cudurka macaanka, waxaanu wax ka qaban doonaa walaacyadan. Waxaa laga yaabaa in aan awoodno in aan dhibaatada ku xallino taleefan. Mararka qaar waxaa laga yaabaa in loo baahdo booqasho kale oo kiliinikada ah ka hor inta aan la ansixin marmarsiiyo kale oo dugsiga ah.
- **Uma** siin doono cudurdaar dugsiga:
  - Maalin ka dib markii ketonku uu yaraaday ama uu xanuunku ka baxay.
  - Maalmo kasta oo mustaqbalka ah oo laga yaabo inuu ilmahaagu seego.
  - Xanuun uusan keenin cudurka macaanka. Wac dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyahaaga caafimaadka.

**Waxyaabaha Qaar ee Ay Tahay in La Xasuusto:**

- Inta badan xaaladaha, ketones aan la heyn matag waxaa lagu daaweyn karaa dugsiga. Haddii kale, isla maalintaas wac xafiiska caafimaadka xubnaha taranka.
- Sonkorta dhiigga oo sareysa ama hooseysa oo la daweeyay. Ma jiro qiime go'an oo lagu ogaanayo in cunuggaaga uu iskuulka joogo iyo in kale.
- Waxaa marwalba lagu siinayaa cudurdaarka dugsiga maalinta balanta rugta caafimaadka ee sonkorta ee canugaaga.


Sii socda…

- Haddii dugsigu uu u soo diraayo cunugaaga guriga marka aan loo baahnayn, la hadal kalkaalisada ama maamulaha dugsiga. Dhakhtarka sonkorowga ama kooxda daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga ayaa kaa caawin kara inaad la hadasho dugsiga sidoo kale.

## Qorshaha 504 ama Qorshaha Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (Individualized Education Plan, IEP)

Haddii uu cunuggaagu leeyahay qorshe 504 iyo/ama Qorshe Waxbarasho Shakhsi ahaaneed (IEP):

- Looma dammaanad qaadayo marmarsiiyo ay kaga maqnaanayaan dugsiga. Weli waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto rugteena caafimaad si aad u hesho cudurdaar iskuul.
- Waa inay sameeyaan wax kasta oo ay ka maarmaan haddii ay iskuulka ka cudurdaartaan.